Ogeysiiska Dhaqanka Asturnaanta ee Macluumaadka Dhawrsoon ee Caafimaadka

Hirgalaya April 14, 2003

Ogaysiiskani wuxuu qeexayaa sida laga yaabo in loo isticmaalo loona wadaagi karo warbixintaada caafimaad iyo sida aad adigu u heli karto warbixintan. Fadlan si kafiirsi leh u akhrio

Olmstead Medical Center waxay kaalmo caafimaad ka bixisaa meelo badan Si aanu shaqo fiican ugu qabano dadka bukaanka ah, cusbitaalka Olmstead Medical Center, Rochester Southeast Clinic iyo dhamaan goobaha caafimaadka ee la xidhiidhaa waxay wadaagi doonaan warbixinta kugu saabsan marka loobaahdo si laguu siiyo kaalmo caafimaad iyo sidoo kale in aanu ugu qabsano hawlo shaqeed. Erayada Ogeysiiskan Dhaqanka Asturnaanta ee Macluumaadka Dhawrsoon ee Caafimaadka waxa lagu dabiqi doonaa adeegyada laga bixiyo dhammaan goobaha.

Si aad u fahanto Warbixintaada Caafimaaadka:

Waqti walba oo aad booqato Cusbitaal, dakhtar amaba meel kaalmo caafimaad lagu bixiyo waa la diiwaan galinayaa booqashada Inta badan, warbixintaada waxa ku qoran waxyaalaha ku haya, tijaabooyinkii laqaadaaday iyo natiijooyinkooda, wixii lagaa helay, sida loo dawaynayo, iyo qorshaha mustaqbalka lagugu dawaynayo. Warbixintan caafimaad waxa loo yaqaana diiwaankaaga caafimaadka amaba. Barbixinta caafimaad ee ku jirta diiwaankaaga caafimaad waxa loo isticmaalaa:

- asaaska lagu qorshaynayo kaalmada iyo daawayntaada
- hab ay ku wada xidhiidhaan kalaaliyaashaada caafimaad ee ka qaybaata daawayntaada
- Dokumanti sharci ah oo qeexaya kaalada lagu siiyay.
- hab adiga iyo shirkada caymiskaagu aad ku hubin kartaan in biilasha loo soo diray ay yihiin kaalmadii lagu siiayay
- hab wax lagu baro kalkaaliyaasha caafimaadka.
- meel laga helo macluumaad cilmi-baaris lagu sameeyo.
- meel laga helo macluumaad ay isticmaalaan saraakiisha caafimaadka bulshadu si ay horumar ugu sameeyaan caafimaadka dalkeena.
- hab aanu u adeegsano kor ugu qaadida tayada kaalmada aanu bixino iyo aan gaadhno

In aad si fiican u fahanto waxa ku qoran diiwaankaaga caafimaad and sida warbixintaada caafimaad loo isticmaalaa waxa kugu caawinaysaa:

- in aad hubiso inuu saxsan yahay
- in aad si fiican u fahanto goorta, meesha iyo sababta ay cid kale u dooni karto ay hesho warbixintaada caafimaad.
- in aad go'aan fiican ka gaarto marka aad u fasaxayso cidkale warbixintaada.

Xuquuqdaada warbixinta caafimaad

In kasta oo ay xarunta isku dubariday ay si guud u leedahay warbixintada caafimaad, waxa ku qoran adiga ayaa iska leh Waxa aad xuquuq u leedahay in aad

- In aad codsato in la yareeyo isticmaalka iyo wadaaga warbixintaada caafimaad. Loogama baahna Olmsted Medical Center in uu kugu raaco codsigaaga. Si aad u yarayso in cidkale lala wadaago warbixintaada, waa in aad si qoraal ah ugaga soo codsato "primacy officer"-ka adiga oo la socodsiinaya Olsmstead Medical Center:
    1. Waxa warbixintaada ka mid ah ee aar rabto in la yareeyo isticmaalkiisa
    2. Hadii ay yarayntu tahay mid samaynaysa isticmaalka amaba wadaagida, amaba labadaba, iyo
    3. Cidda aad rabto in yarayntani saamayso (tusaale, dakhtaro kale ama caymis iwm.)

- Ku hel codsi nuqul waraaqa ee Ogeysiiska Dhaqanka Asturnaanta ee Macluumaadka Dhawrsoon ee Caafimaadka.

- In aad eegto aad heshana koobi ah warbixintaada caafimaadka Waa in aad si qoraalah codsigaga ugu soo gudbisaa shaqaalaha Olmsted Medical Center. Hadii aad codsato koobi warbixintaada ah, waxa laga yaabaa in Olmsted Medical Center uu kugu soo dalaco lacagta ku baxaysa, ilaa inta uu ogolyahay sharciga gobolku iyo dawladda federali ah.

- Codsi in la saxo ama wax lagu daro warbixintaada caafimaad hadii aad aaminsantahay in ay wax ka qaldan yihiin amaba ka dhimanyihiin. Si aad u codsato in wax laga badalo warbixintaada, waa inaad u soo gudbisaa codsi qoraal ah xaruntaada caafimaadka, kalkaaliyaha, amaba privacy officer-ka Olsted Medical Center, adigoo sheegaya sabab taageeraysa codsigaaga. Waxa laga yaabaa in Olmsted Medical Center uu diido codsigaaga xaaladaha qaar, taas oo ay ka mid tahay mark aan go'aansano in warbixintaadu ay saxan tahay amaba ay dhamaystiran tahay.

- Sidaad u heli karto tiro-koobka wadaagidda warbixintaada caafimaad Tiro-koobka kuma jirto warbixinta loo wadaagay daawayn awgeed, lacag bixin amaba sabab kalkaalmo caafimaad, mid adigu aad fasaxday amaba hadii adiga warbixinta lagu siiayay, warbixin la wadaagay April 14keeda 2003 kahor. Si aad u codsato tiro-koob, waa in aad codsi qoraal ah usoo gudbisaa privacy officer-ka Olmsted Medical Center. Codsigaagu waa inuu sheego mudadda tiro-koobka, muddada tiro-koobka aad codsanaysaana waa in aanay ka badnayn lix sanadood. Waxaad heli kartaa hal tiro-koob oo lacag la'aan ah muddadii 12bilood ah. Waxaa laga yaabaa in Olmsted Medical Center uu lacag kugusoo dalaco hadii aad codsato tiro-koobyo kale.

- Xuquuqda aad u leedahay xiriir qarsoodi ah oo ku saabsan warbixintaada caafimaad. Waxa aad codsan kartaa in aanu si gaar ah kuula soo xiriirno, (tusaale, tilifoon) amaba meel gooni ah (tusaale, shaqada, guriga maya) Hadii aad rabto in si qarsoodi ah laguula soo xiriiro, waa in aad codsigaaga qoraal ugu soo gudbisaa Olmstead Medical Center privacy officer. Codsigaagu waa inuu qeexo sida iyo meesha aad rabto in lagaala soo xiriiro, waxa laga yaabaa in Olmstead Medical Center uu kaaga baahdo in aad soo sheegto sida aad u bixinayso lacagta. Waxaanu ogolaanaynaa dhamaan codsiyada xidhiidh qarsoodi ah ee macquulka ah.

- Si aan ula noqoto fasaxa aad bixisay ee isticmaalka ama wadaaga warbixintaada caafimaad marka laga reebo talaabooyinka la qaaday.

Masuuliyadaha Olstead Medical Center:

Ururkayaga waxa looga baahanyahay:

- In aanu qarsoodi ka dhigno warbixintaada caafimaad.
- Aanu kugula soo socodsiino ogaysiis waxyaabaha sharciga nagu ah iyo habdhaqanka qarsoodiga ah ee saamaynta ku leh warbixinta aanu kaa diyaarinay.
- In aanu u hogaansanaano qodobada ogaysiiskan.
- In aanu aqbalno codsiyada macquulka ah ee aad ku dalbatay in aau si ama meel gooni ah kaagala soo xiriirno.

Waxaanu xaq u leenahay in aanu badalno habdhaqankayaga iyo in aanu ku darno qodobo cusub o saamaynaya dhamaan warbixinaha caafimaad ee aanu hayno. Hadii uu uu isbadal ku yimaado hab-dhaqankayaga warbixinta caafimaad, si degdeg ah ayaanu u badalaynaa ogaysiiskan uguna sheegaynaa website-kayaga (www.olmstedmedicalcenter.org).

Sida laga yaabo in aau u isticmaalno una wadaagi karno warbixintaada caafimaad:

Waxaanu u isticmaalnaa una wadaagnaa warbixintaada caafimaad sababo badan oo kala duwan. Hoos, waxa aanu ku qeexaynaa siyaabaha kala kuwan eeaanu u isticmaalno una wadaagno, anagoo kusiinayna tusaalayaal.

I. Daawaynta

Waxa laga yaabaa in aanu isticmalno lana wadaagno warbixintaada caafimaad xarumaha kaalmada caafimaadka, kalklaaliyayaasha, ardayda caafimaadka iyo shaqaalaha kale ee ee kusiinaya amaba ku lug leh caafimaadkaaga Waxaanu kusoo weydiisanaynaa fasax qoraal ah ka hor inta aanaan la wadaagin warbixintaada meelaha ka baxsan Olmsted Medical Center si laguu daaweeyo, marka laga reebo xaaladaha degdega ah.

Tusaale ahaan: Hadii lagaa daawaynayo dhaawac jilibka kaa gaaray, waxa aau la wadaagaynaa warbixintaada caafimaadka qaybta Kaalmada Naafada si ay kuu daryeelaan.

II. Lacag bixinta.

Waxa laga yaabaa in aanu isticmaalno warbixintaada caafimaadka si aanu biil kuugu soo dirno amaba kaaga dalbano lacagta ku baxday kaalmada caafimaad ee lagu siiyay. Waxa laga yaabaa in aanu kusoo weydiisanaynaa fasax guud oo qoraal ah inta aanaan wadaagin warbixintaada sabab lacag raadis ah awgeed.

Tusaale ahaan: Biil baa laga yaabaa in loo diro shirkada caymiskaaga. Warbixinta ku qoran ama la socota biilka waxa ka jiri kara wax lagugu garan karo, iyo sidoo kale xanuunada lagaa helay, daawaynta iyo qalabla la isticmaalay.

III. Shaqo kaalmo caafimaad.

Waa laga yaabaa in aanu u isticmaalno oo wadaagno warbixintaada caafimaad si aanu u qabano shaqo kaalmo caafimaad. Waxaanu kusoo weydiisanaynaa fasax guud oo qoraal ah ka hor inta aanaan la wadaagin warbixintaada caafimaad meel ka baxsan Olmsted Medical Center sababahan awgood.

Tusaale ahaan: Qaar ka mid ah shaqaalaha amaba shaqaalaha tayo kor u qaadida ayaa laga yaabaa in ay is ticmaalaan warbixinta caafimaadkaaga si ay u qiimeeyaan kaalmada lagu siiyay iyo natiijada ka soo baxday hawshaada iyo dadka kula mid ka ah. Warbixinta markaa waxa loo isticmaalayaa in si joogto ah kor loogu qaado tayada iyo kartida kaalmada caafimaad ee aanu bixino.

<u>Isticmaalka iyo wadaaga Ee aan u baahnayn Fasaxaaga:</u>

Waxa laga yaabaa in aanu u isticmaalno oo uwadaagno warbixintaada adigoon fasax nasiin sababaha soo socda awgood:

I. **Marka ay dawladdaha hoose, federali, maxkamad amaba qaybaha xoojinta sharcigu u baahan yihiin.** Waanu wadaagnaa warbixintaada marka sharcigu nooga baahdo in aanu u gudbino laamaha dawladda amaba shaqaalaha xoojinta sharciga. Tusaale ahaan, waxa nagu waajib ah in aanu warbixin gudbino hadii aau ka shakino in ilmoyar dhib loo gaytay, dhaawac toogasho ah iyo wixii la mid ah. Waxa kale oo nagu waajib ah in aanu warbixintaada la wadaagno marka ay maxkamadi codsato.

II. **Dhaqdaaqa Caafimaadka Shacbiga.** Waxa aanu warbixin ku saabsan dhalashooyinka, dhimashooyinka iyo cuduro kala duwan u gudbinaa saraakiisha dawladda ee ka mas'uulka ah ururinta macluumaadkaa.

III. **Diiwaan-galinda Dadka Dhinta.** Marka uu qof dhinto, waxa aanu siinaa dakhtarka baara sababta dhimashada warbixinta loo baahanyahay dhimashooyinka qaarkood, waxaana nagu waajib ah in aanu la wadaagno warbixinta caafimaadka marka uu dhakhtarka baarista dhimashadu naga codsado. Waxa laga yaabaa in aanu sheegno sababta dhimashada iyo waxyaabo kale masuuliyiinta shirkadaha aaska si ay waajibkooda u gutaan. Wadaagida kale ee warbixintu waxy u baahan tahay fasaxa labada qof ee is qaba ka nool, waalidka, dadka si qoraal ah lagu wakiishay amaba dadka sida sharciga ah uga mas'uulka ah.

IV. **Hawlaha kor-ka ilaalada Caafimaadka:** Waxa aanu warbixin u gudbinynaa dawladda si aanu u caawino marka ay baadhis ku samaynayaan xarun kaalmo caafimaad amaba urur, sida sharcigu ogol yahay. Sharciga Minnesota wuxuu u baahan yahay in warbixinta laga masaxo wixii lagu garan karo bukaanka intaan loo wadaagin sababahan oo kale, marka laga reebo hadii aad Olmsted Medical Center fasax qoraal ah.

V. **Ujeedooyinka Unug ku Deeqidda:** Waxa laga yaabaa in aan wargalino ururada unugyada uruuriya si aanu ugu caawino unug, il amaba maqaar ku deeqid. Warbixinta la wadaagayaa waxay ku koobantahay wixii loogu baahan yahay in ay suurto galiso unug-kala-badalka.

VI. **Sababo Cilmi-baariseed:** Sharciga dawladda federaliga ah ayaa u ogolaaday inuu Olmsted Medical Center wadaago warbixintaada caafimaad si cilmi baaris loogo sameeyo marka adiga fasax qoraal ah lagaa helo amaba ay cilmi baarista ka fiirsatay Guddi in uunu cadaynayn wax adiga kuu khaas ah, inta aanay cilmi baaristu bilaabmin. Xaaladaha qaar, cilmi baarayaasha waxa loo ogol yahay in ay u isticmaalaan warbixintaada si kooban si ay ugo'aan sadaan in dadka ka qayb qaadanayaa ay ku fiican yihiin. Sharciga Minnesota guud ahaan wuxuu nooga baahan yahay in aanu fasax guud kaa helno inta aanan la wadaagin warbixintaada cilmi baarayaal kale. Sida sharcigu nooga baahan yahay waxa aanu aad isugu dayaynaa in aanu fasax ama diidmo kaa helno si aad uga qayb gasho cilmi baarista, inta aanaan wadaagin wax lagugu garan karo cilmi baarayaal kale.

VII. **Si looga hortago wax dhibaato ah:** Si looga hortago khatar saamaynaysa caafimaadka ama amaanka qof amaba dadweynaha, waxa laga yaabaa in aanu u gudbino warbixin Booliska amaba dadka ka mas'uulka ka hortagga khatartaas oo kale. Sharciga Minnesota guud ahaan ma ogola in la wadaago warbixinahaas oo kale hadii aan adiga fasax lagaa haysan amaba wadaagaas oo kale aanu sharcigu banaynin, marka lagu daru xaaladaha ay shaqaalaha Olmsted Medical Center "waajib u leeyihiin in ay digniin bixiyaan"

VIII. **Shaqooyin dawladda u khaas ah:** Waxa laga yaabaa in aan wadaagno warbixinta caafimaadka dadka militariga ah amaba ka mid ahaan jiray xaalada qaarkood sida sharcigu baneeyay amaba aad ku fasaxday ogolaansho qoraal ah. Waxa laga yaabaa in aanu u wadaagno warbixintaada caafimaadka sabaaha la xidhiidha ilaalada dalka, hadii uu nooga baahdo sharcigu inaanu sidaas samayno amaba aanu kaa haysano fasax qoraal ah

IX. **Sababaha mag-dhabida shaqaalaha.** Waxa laga yaabaa in aanu bixino warbixinta caafimaadka si aanu u waafaqno sharciyada Mag-dhowga Shaqaalaha. Waxa naloo ogolyahay inaanu la wadaagno warbixinta mag-dhowga shaqaalaha cidii ku lugleh codsiga mag-dhowga anaga oo aan kaa haysan ogolaansho marka ay warbixintu la xidhiido codsigaas.

X. **Xusuusinta Balamaha iyo Faa'iidooyinka la xidhiidha daryeelka caafimaadka:** Waxa laga yaabaa in aanu u isticmaalno warbixinta si aanu kuu xasuusino balamaha aad leedahay iyo kaalmooyinka kale amaba kaalmooyinka caafimaadka ee aanu bixino.

XI. **Ololaha Lacag Uruurinta:** Waxa laga yaabaa in aanu isticmaalno in kooban oo ka mid ah warbixintaada caafimaad (magaca, meesha aad degan tahay, taariikhda lagu daryeelay) marka aanu lacag u uruurinayno cusbitaalka.

<u>Laba Isticmaal iyo Wadaag oo aad fursad u haysato in aad Diido:</u>

I. **Liiska Bukaanka:** Waxa laga yaabaa in aanu ku darno magacaaga, meesha aad cusbitaalka kaga jirto, xaaladaada guud iyo diintaada si loo garto meel laguugu soo hagaago. Warbixintan waxa la siinayaa shaqaalaha kiniisada iyo dadka kale ee magacaaga garanayaa hadii ay na weydiiyaan. Marka laga reebo diintaada, cidii magacaaga garanaysa ee nakaa waydiisa waxa loo sheegayaa meesha ay kaala soo xiriiri karaan cusbitaalka dhexdiisa. Waxa laga yaabaa in diinta aad haysato loo sheego dadka kiniisada, xataa hadii aanay na waydiinin. Hadii aad jeceshahay in aanu Olmsted Medical Center wadaagin macluumaadkan, fadlan usheeg qaybta Admissions-ka amaba shaqaalaha kalkaaliyayaasha ah.

II. **Wargalinta qaraabada, asxaabta iyo dadka kale.** Waxa kaliya oo Olmsted Medical Center uu la wadaagayaa warbixintaada caafimaad dadka ku daryeelaya, ee kugu caawinaya in aad biilashaada bixiso, ama qaraabada iyo asxaabta kuu dhow hadii ay u ogaanayaan xaaladaada si ay kuu caawiyaan, iyo inta kale ee uu sharcigu ogol yahay. Waxa laga yaabaa, tusaale ahaan, in aanu siino warbixin caafimaad oo kooban si uu qof reerkaaga ahi uu daawo kuugo soo gado. Guud ahaaan waxa aanu kaa qaadanaynaa fasax qoraal ah ka hor inta aanan reerkaga amaba asxaabaada lawadaagin warbixitntaada. Hadii aad awoodo in aad go'aan ka gaarto arrimahaaga caafimaad, Olmsted Medical Center wuxuu ku waydiidiisanayaa fasax inta aanu la wadaagin warbixintaada sababahaa dartood. Hadii aanad awoodin in aad go'aan ka gaarto arrimahaaga caafimaad, Olmsted Medical Center wuxu lawadaagayaa warbixintaada caafimaad ee muhiimka ah reerkaaga amaba dadka kaa mas'uulka ah, hadii aanu garano in ay faa'iido kuugu jirto, marka lagu daro xaaladaha degdega ah.

Isticmaalka iyo wadaaga kale:

Marka laga reebo sida dusha ku qeexan, Olsted Medical Center ma isticmaali doono mana wadaagayo warbixintaada hadii aanay adiga amaba masuulkaaga sharciga ah ka haysan ogolaansho qoraan ah Hadii aad fasax siiso Olmsted Medical Center, waxaad kagala noqon kartaa fasaxaaga codsi qoraal ah, kadibna ma isticmaalayno mana wadaagayno warbixinta caafimaadkaaga, marka laga reebo talaabooyinka aanu qaadnay intii aanu fasaxa kaa haysanay.

Hadii aad rabto faahfaahin ama aad dhibaato nala soo socodsiido:

Hadii aad qabto wax su'aalo ah amaba aad u baahantahay faahfaahin, waxaad kala soo xidhiidhi kartaa sarkaalka asturnaanta ee Olmstead Medical Center 507.292.7020.

Hadii aad aaminsantahay in qalad laga galay, waxa aad u sheegi kartaa privacy officer-ka Olsted Medical Center amaba xoghayaha Caafimaadka iyo Daryeelka dadweynaha. War aar-goosi ahi ma jiro hadii aad naga cabanayso